



UJEEDO: HESHIIS KU SAABSAN KALA GADASHO DHUL BANAAN "LEHNA SHARCI MUNICIPALLE AH"

Maanta oo ay taariikhdu tahay 13/11/2025, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha Dhinaca Galbeed ee Daarta Maalin Taajir ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iiyimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos ku Xusan:-

ISKA IIBIYE:- MUSTAF ADEN SAID , Somali ah, Hooyo: Dahabo Mohamud Ali, Ku Dhashay: Galkacyo, Sanadkii: 1984, Degan Muqdisho, Sita: Somali Passport, Lr. P01510383	IIBSADE:- ABSHIR SAHAL BULAALÉ JIMCAALE, Hooyo: Isniino Kulmiye Diirshe, Somali ah, Ku Dhashay: Hobyó, Sanadkii: 1960, Degan Muqdisho, Sita: National ID, Lr. 26001017654497
TILMAAMAHA DHULKA LA KALA IIBSANAAYO Dhul Banaan oo Ku yaal: Muqdisho , Degmada: (Hodan), Cabirka: (20X15)-M, Looto No: 134 -, W.M.L: (72711/MPN/2019), Tr. 12/11/2019, Kana Soo Baxay Nootaayo Muqdisho, Uuna Saxiixay Dr. Saciid Cali Cosoble	SOOHDINTA DHULKA Bari: Dhul dad, Koonfur: Dhul dad, Galbeed: Jid , Waqooyi: Dhul dad QIIMAHA DHULKA: USD \$80,000 (Siddeetan Kun oo Doolarka Mareykanka ah).
ASALKII HORE: Xuseen Sheekh Axmed "Kadare" RL:- 173519, Tr. 08/09/1984, Sabarlog No: 59/37/1984, Tr. 10/09/1984, Kana Soo Wada Baxeen D/Hoose ee Muqdisho Cabirka (22.700-MQ)-M.	

B- Aniga oo ah **MUSTAF ADEN SAID**, Waxaan qoraalkaan ku cadaynayaa aniga oo maskaxda Iyo Caqligaba ka fiyoow Cid I qasabtayna Aysan Jirin in aan ka gaday kuna wareejiyey **ABSHIR SAHAL BULAALÉ JIMCAALÉ** Dhulkayga banaan oo tilmaamihisu sare ku xusan yahay, Waxaan kale oo aan Cadaynayaa in dhulkaan uu ka madax banaan yahay rahan, xuquuq ama sheegasho cid kale, iyo wax kasta oo horjoogsan kara heshiiskan, Sidaas daraadeed Wixii Ceebaal ah, ee Ka Yimaada Dhulkaan Sida Danguud, Dukuminti Ka Horeeyey dukumintigaan, ama Duris Sharci iyo Wixii La Mid ah aniga ayaa Mas'uul Ka ah, Waxaan Kale oo Cadeynayaa in aan Qaatay Dhamaan Lacagta Sare Ku Xusan.

T- Aniga oo ah **ABSHIR SAHAL BULAALÉ JIMCAALÉ** Ahna Iibsadaha dhulkaan, Waxaan Nootaayada Horteeda Ka Caddaynayaa in aan ka Gudoomay Iska iibiyaha Milkiyada Dhulkaan Kuna qancay heshiiskan.

J- Anaga oo Kala ah Cali Cabdi Axmed & Raage Aadan Saciid Waxaan Cadaynaynaa in aan Markhaatiyaal iyo Goob Joogba Ka nahay Beecaan.

SAXIIXA ISKA IIBIYAHA DHULKA

MUSTAF ADEN SAID



SAXIIXA IIBSADAHA DHULKA

ABSHIR SAHAL BULAALÉ JIMCAALÉ



SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

1- CALI CABDI AXMED



2- RAAGE AADAN SACIID



(XAFIISKA NOOTAAYAHA)

REP. 1949/T.P.N/25, Tr. 13/11/2025, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee 1- **MUSTAF ADEN SAID** Ahna (Iska iibiye), 2- **Abshir Sahal Bulaale Jimcaale** Ahna (Iibsade) iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Beecaan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayada Waxaana Loo Keydiyey Nuqul.



NOOTAAYAHA

Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"

REF:1949/T.P.N/2025

Tr:-13/11/2025

MASAWIRKA ISKA IIBIYAHA

MUSTAF ADEN SAID



MASAWIRKA IIBSADAHA DHULKA

ABSHIR SAHAL BULAALE



MASAWIRKA MARKHAATIYAASHA

1-CALI CABDI AXMED



2-RAAGE AADAN SACIIF





XAFIISKA NOOTAAYAHA MUQDISHO

UJEEDO: HESHIIS KU SAABSAN KALA GADASHO BOOS BANAAN OO MUNICIPALLE AH

Muqdisho: Maanta oo ay taariikhdu tahay **12/11/2019**, anigoo ah **Dr. Saciid Cali Cosoble**, ahna Nootaayaha Muqdisho, xafiisna ku leh inta u dhaxaysa Masjidka Abuhurayra iyo Shirkadda Dahabshiil ee Suuqa Bakaaraha ee Magaalada Muqdisho, waxaa xafiiska iigu yimid ayagoo heshiis ah, mudanayaasha hoos ku xusan:

ISKA IIBIYE: Raage Aadan Saciid "Dhagacaleen",
Hooyo: Dahabo Maxamuud Cali, Somali ah, Ku
Dhashay: G/kacyo, Sanadkii: 1976, degan Muqdisho,
Leh: Somali Passport , Lr. P00499645

IIBSADE: Mustaf Aadan Saciid, Hooyo: Dahabo
Maxamuud Cali, Somali ah, Ku Dhashay: G/kacyo,
Sanadkii: 1984, degan Muqdisho

WARBIXINTA DHULKA LA KALA IIBSANAAYO
Kuna yaal: **Muqdisho**, Degmada: **Hodan**, Cabirka:
(20X15-M), Looto No: **134**, W.M.L: 70064/2018, Tr.
25/11/2018, Kana Soo Baxay Nootaayo Muqdisho, Dr.
Saciid Cali Cosoble

SOOHDINTA DHULKA
Bari: Dhul dad, Koonfur: Dhul dad, Galbeed: Jid,
Waqooyi: Dhul dad
Qiimaha Dhulka: **USD \$60,000** (Lixdan Kun oo
Doolarka Mareykanka ah).

ASALKII HORE EE DHULKA Magaca: Xuseen Sheekh Axmed "Kadare", Cabirka: **22.700-MQ**, Rasiid No. 173519/84,
Tr. 08/09/1984, Sabarlog: 59/37/1984, Tr. 10/09/1984, Kana Soo Wada Baxeen Dawladda Hoose ee Muqdisho

Hadaba qoraalka sare iyo kan soo socda oo wada xariira ayaa dhinacyada heshiiska waxay caddeynayaan sidatan:

ISKA IIBIYE: Aniga oo ah **Raage Aadan Saciid "Dhagacaleen"**, waxaan qoraalkaan ku cadaynayaa aniga oo maskaxda iyo caqligaba kafiyoow in aan ka gaday kuna wareejiyey **Mustaf Aadan Saciid** dhulkayga banaana oo tilmaamihiisu sare ku xusan yihiin, waxaan kale oo aan cadaynayaa in dhulkaan uu ka madax banaana yahay rahan, xuquuq ama sheegasho cid kale, iyo wax kasta oo horjoogsan kara heshiiskaan, isla markaana aan anigu mas'uul ka noqon doono wixii ceebaal milkiyadeed ah ee la xiriira isla dhulkaan, waxaan kaloo caddaynayaa in aan qaatay dhammaan lacagta sare ku xusan, wixii taariikhda sare ka danbeeyana dhulkaan milkiyadiisa, faa'iidadiisa iyo bixinta canshuureedba wuxuu u wareegay iibsade **Mustaf Aadan Saciid**.

IIBSADE: Aniga oo ah **Mustaf Aadan Saciid**, waxaan dhankayga heshiiskan ku caddaynayaa in **Raage Aadan Saciid "Dhagacaleen"** uu iga iibiyay iguna wareejiyay dhulkaan lehna sifaha uu ku soo xusay isla markaana aan ka gudoomay kuna qancay heshiiskaan.

MARKHAATIYAASHA: Anaga oo kala ah **1-Saalax Aaden Saciid** **2-Cali Xirsi Dhabac**, waxaan qoraalkaan ku cadaynaynaa in aan markhaati iyo goob joogba ka nahay beeca dhulka sare ku xusan.

SAXIIXA ISKA IIBIYAHADA DHULKA

RAAGE AADAN SACIID "DHAGACALEEN"

Raage Aadan Said

SAXIIXA IIBSADAHADA DHULKA

MUSTAF AADAN SACIID

Mustaf Aadan Saciid

SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

1- SAALAX AADEN SACIID

2- CALI XIRSI DHABAC

Rep. 72711/MPN/2019

(CADDEYNATA NOOTAAYAHA)

Tr. 12/11/2019

Anigoo ah Nootaayaha Muqdisho, **Dr. Saciid Cali Cosoble**, waxaan caddeynayaa in saxiixyada sare yihiin kuwii runta ahaa **1-)Raage Aadan Saciid "Dhagacaleen"** (ahna iibiyaha dhulka), **2-)Mustaf Aadan Saciid** (ahna iibsadaha dhulka), iyo waliba labada nin ee soomaaliyeed oo dhanka maragga ka caawiyey oo kor ku xusan, dadkaan oo anigu aqoonsadey hubiyeyna in magacyadaas ay leeyihiin waxay heshiiskaan igula saxiixeen xafiiska iyaga oo xis qaba raalina ah, caafimaad qaba, xiskooduna taam yahay, cid khasbeysana aysan jirin, waana beec ansax ah oo waafaqsan Shareecada Islaamka.


By: C/fitaax



NOOTAAYAHA
DR. SACIID CALI COSOBLE


MASAWIRKA ISKA IIBIYAHA

Raage Aadan Saciid.



MASAWIRKA MARAGA 1-AAD,

Saalax Aadan Saciid




MASAWIRKA IIBSADAHA

Mustaf Aadan Saciid



MASAWIRKA MARAGA 2-AAD

Cali Xirsi Dhabac.



R.1949/T.P.W/25
P.13/11/25
20X15-M
L.134-

445

Form 10

A



Xaashida Sare
ORIGINAL

JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA
XISAABIYAHA GUUD EE DOWLADDA

No. 49644

Lacag Qabasho Guud
(GENERAL RECEIPT)

Meesha SA Taariikh 19-11-19

Waxaa laga qabray Boqor Adnan Saadiq

Lacag dhan Sh. 1000 baqal tuban & kabo

Oo ah

FAAHFAAHIN

Madaxa	M-xige	Sh.	Sent
	1000	\$ 600	
		\$ 12	
Saxiixa lacag qabtaha	<u>[Signature]</u>	Isugeyn Guud	\$ 612
Jagada			

Dhiibana Lacagta - Original
Xis-Guud Dawladda - 2nd COPY
Buugga Ayu ku Harayaa 3rd COPY



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMALIYA
Wasaaradda Maaliyadda
Waaxda Canshuuraha Barriga
WARQADDA RUQSADA GADIDDA HANTIDA

TIRSI#: 2019 - TRS-053016



Waaxda Canshuuraha Barriga ee Wasaaradda Maaliyadda Waxey Ruqseysay Wareejinta Hantida ay faahfaahinteedu hoos ku xusan tahay:

NOOCA HANTIDA MA GUURTADA AH:

DHUL BANAAN

LOT NUMBER

134

TITLE DEED NO

WML 70064/2018 TR.25/11/2018

DEGMADA

Hodan

CABIRKA

20X15

CIDDA WAREEJINEYSA

RAAGE AADAN SACIID "DHAGACALEEN"

CIDDA LAGU WAREEJINAYO

MUSTAF AADAN SACIID

NOTARY

SACIID NOOTAAYO

NOTARY REF

72711/MPN/2019

QIIMAHA LAGU KALA GATAY

\$60,000.00

Taariikda la bixiyey:

19/11/2019 00:00:00



TRS-
053016

Waaxda Cansuuraha Barriga





XAFIISKA NOOTAAYAHA MUQDISHO

UJEEDDO: (HESHIIS KU SAABSAN KALA GADASHO BOOS BANAAN OO MUNCIPALE AH).

Muqdisho maanta oo ay tariikhdu tahay 25/11/2018, Anigoo ah, Dr.Saciid Cali Cosoble, ahna Notayaha Muqdisho, Xafiisna ku leh inta u dhaxaysa Masjidka Abuhurayra iyo Shirkadda Dahabshiil ee Suuqa Bakaaraha ee Magaalada Muqdisho, waxaa Xafiiska iigu yimid iyagoo hishiis ah, mudanayaasha hoos ku cad ina weydiistay in aan u kala qoro hishiiskooda hoos ku cad:-

1-)Aniga oo ah Maxamed Tawane Sabriye, Waxaan heshiisnaan ku cadeynayaa aniga oo xis qaba in aan ka iibiyey kuna wareejiyay Raage Aaden Saciid "Dhagacaleen" Dhulkayga banaana ee ku yaal Xamar, Degmada Hodan, Dhulkaan oo aan ku Milkiyey W.M.L.66248/2018, Tr.01/01/2018, Kana Soo baxday Nootaayo Muqdisho, uuna Saxiixay Dr. Saciid Cali Cosoble, Dhulkaan oo Cabirkiisu dhan yahay (20X15-M).Lotto.L.134, Soohdimihiisuna kala yihiin Galbeed Waxaa ka mara Jid, Inta kalana waa Dhul Dad, Wuxuuna Iibsadaha Dhulkaan Iiga Iibsaday lacag dhan USD 60,000/\$ (Lixdan Kun oo Dollar oo aan lacagtaas wada qaatay), Waxaan kale oo aan caddeynayaa in dhulkaan uu ka madax banaana yahay rahan, xuquuq ama sheegasho cid kale iyo wax kasta oo horjoogsan kara heshiisnaan, isla markaana aan anigu mas'uul ka noqon doono wixii ceebaal milkiyadeed ah ee laxiriira isla dhulkaan, Wixii Taariikhdaani Sare Ka ka bilowdana dhulkaan Milkiyadiisa, Faa'iidadiisa, Tasarufkiisa iyo Waajibaadkiisa Canshuureedba Wuxuu u wareegay (Raage Aaden Saciid "Dhagacaleen")

2-)Aniga oo ah Raage Aaden Saciid "Dhagacaleen", Waxaan dhankeyga heshiisnaan ku caddeynayaa in Maxamed Tawane Sabriye uu iga iibiyey uguna wareejiyey dhulkaan uu sare uga soo hadlay oo waxba dhimaneyn lehna sifaha uu ku sheegay aniguna aan ka gudoomay kuna qancay.

3-)Anaga oo kala ah Cismaan C/qaadir Ciise iyo Raage Xasan Saciid Xasan, waxaan heshiisnaan dhankeena ku caddeynaynaa in aan Markhaati iyo Goob Joog ka nahay Beecan sare ku xusan.

SAXIIXA ISKA IIBIYAHA

Maxamed Tawane Sabriye

SAXIIXA IIBSADAHA

Raage Aaden Saciid "Dhagacaleen"

1-)Cismaan C/qaadir Ciise

SAXIIXYADA MARQAATIYAASHA

2-)Raage Xasan Saciid Xasan

Rep. 70064/ 2018

(CADDAYNTA XAFIISKA NOOTAAYAHA)

Tr. 25/11/2018

Aniga Nootaaya Muqdisho, Dr.Saciid Cali Cosoble waxaan caddeynayaa in saxiixyada sare yihiin kuwii runta ahaa 1-) Maxamed Tawane Sabriye, Somali ah, Hooyadiisna layiraahdo Faadumo Daahiye Cabdulle, ku Dhashay Muqdisho, Sanadkii 1978, Degan Muqdisho oo Sita Ptante Lam.4364/Muqdisho ahna (Iska Iibiye), 2-) Raage Aaden Saciid "Dhagacaleen", Somali ah, Hooyadiisna layiraahdo Dahabo Maxamuud Cali, ku Dhashay G/kacyo, Sanadkii 1976, Degan Muqdisho, oo ah (iibsade) Iyo waliba Labada nin ee Soomaaliyeed oo dhanka maragga ka caawiyey oo kor ku xusan, Dadkaan oo anigu aqoonsadey hubiyeyna in magacyadaas ay leeyihiin waxay heshiisnaan igula saxiixeen Xafiiska iyaga oo xis qaba raalina ku ah.


By: C/Fitaax



=NOOTAAYAHA=
(Dr.Saciid Cali Cosoble)

MASAWIRKA ISKA IIBIYAHA

Maxamed Tawane Sabriye.



MASAWIRKA MARAGA 1-AAD.

Cismaan C/qadir Ciise.




MASAWIRKA IIBSADAHA

Raage Aaden Saciid



MASAWIRKA MARAGA 2-AAD.

Raage Xasan Saciid



Rep No = 72711/19
MOH (20X15) - 4
Looto (134)
JR - 12/11/2019

Dawladda Federaalka Soomaaliya
Wasaaradda Gaadiidka



Federal Republic of Somalia
Ministry of Transportation

Aqoonsiga Dereewalka | Driving License



L/Aqoonsiga - License No

4364

Magaaca - Name

Max'ed Tawane Sabriye

Jinsiyadda - Nationality

Somali

Taariikhda Dhalashada - Date of Birth

01/01/1978

Meesha laga Bixiyey - Place of Issue

Muqdisho

Huurka Gaadiidka - Vehicle Type

D

Taariikhda La Bixiyey - Issued Date

16/06/2015

Taariikhda la Qaaday - Expiry Date

16/06/2018





JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMALIYA
Wasaaradda Maaliyadda
Waaxda Canshuuraha Barriga
WARQADDA RUQSADA GADIDDA HANTIDA

TIRSI# : 2018 - TRS-028724



Waaxda Canshuuraha Barriga ee Wasaaradda Maaliyadda Waxey Ruqseysay Wareejinta Hantida ay faahfaahinteedu hoos ku xusan tahay:

NOOCA HANTIDA MA GUURTADA AH:

DHUL BANAAN

LOT NUMBER

134

TITLE DEED NO

WML 66248/2018 TR.01/01/2018

DEGMADA

Hodan

CABIRKA

20X15

CIDDA WAREEJINEYSA

MAXAMED TAWANE SABRIYE

CIDDA LAGU WAREEJINAYO

RAAGE AADEN SACIID "DHAGACALEEN"

NOTARY

SACIID NOOTAAYO

NOTARY REF

70064/2018

QIIMAHA LAGU KALA GATAY

\$60,000.00

Taariikda la bixiyey:

27/11/2018 00:00:00



TRS-
028724

Waaxda Cansuuraha Barriga



M. Abdullahi



XAFIISKA NOOTAAYAHA MUQDISHO

UJEEDDO: HESHIS KU SAABSAN KALA GADASHO DHUL BANAAN OO MUNCIPAAL AH

Muqdisho maanta oo ay tariikhdu tahay **01/01/2018**, Anigoo ah, **Dr.Saciid Cali Cosoble**, ahna Notayaha Muqdisho, Xafiisna ku leh inta u dhaxaysa Masjidka Abuhurayra iyo Shirkadda Dahabshiil ee Suuqa Bakaaraha ee Magaalada Muqdisho, waxaa Xafiiska iigu yimid iyagoo hishiis ah, mudanayaasha hoos ku cad ina weydiistay in aan u kala qoro hishiiskooda hoos ku cad:-

1-)Aniga oo ah **Cabdi Saciid Sh. Cali Cilmi**, Waxaan heshiis kaan ku cadaynayaa aniga oo xis qaba in aan ka iibiyay kuna wareejiyey **Maxamed Tawane Sabriye Dhul Banaan** oo ay qeyb dhaxal u heleen **1-Muna Cali Saciid Sh. Cali** iyo **2-Faadumo Cali Saciid Sh. Cali**, Dhulkaan oo aan ku gaday 1-)Warqad Wakaalad Gaar ah Rep.20100/2017, Tr,16/10/2017, Kana Soo Baxday Nootaayo Nairobi, Ayna Wada Saxiixeen Kaaliye Cali Cusmaan Jimcaale "Cali Notaayo" iyo Dr, Aadan Jimcaale Maxamed, 2-)Warqad Wakaalad Guud Rep.65147/2017, Tr,15/10/2017, Kana Soo Baxday Nootaayo Muqdisho Uuna Saxiixay Dr. Saciid Cali Cosoble, Dhulkaan oo ku yaal Xamar Degmada (**Hodan**), Gaar ahaan "Daarta Maslax" Lehna W.M.L.58907/2015, Tr. 04/11/2015, Kana Soo Baxday Nootaayo Muqdisho uuna Saxiixay Dr, Saciid Cali Cosoble, Lehna Nullo Oste Ku Lifaqaan warqadaan, Dhulkaan oo Cabirkiisu dhan yahay (**20X15-M**).Lotto.Lr. (**134**), Soohdimihiisuna kala yihiin Galbeed waxaa ka mara **Jid**, inta kalane waxaa ka xiga dhul dad, Wuxuuna iibsadaha dhulkaan iiga iibsaday lacag dhan USD **50,000/\$** (Kontan Kun oo Dollar oo aan lacagtaas wada qaatay), Waxaa kale oo aan caddaynayaa in dhulkaan uu ka madax banaan yahay rahan, xuquuq ama sheegasho cid kale iyo waxkasta oo horjoogsan kara heshiis kaan, isla markaana aan anigu mas'uul ka noqon doono wixii ceebaal milkiyadeed ah ee laxiriira isla dhulkaan. Waxii taariikhda sare ka bilowdana dhulkaan milkiyadiisa faa'iidadiisa iyo waajibaadkiisa canshuureedba wuxuu u wareegay (**Maxamed Tawane Sabriye**)

2-)Aniga oo ah **Maxamed Tawane Sabriye**, Waxaan Heshiis kaan dhankayga ku cadaynayaa ii **Cabdi Saciid Sh. Cali Cilmi** iga iibiyey iguna wareejiyay dhulkaan afartiisa dhinac ee kala duwan oo waxba dhimaneyn lehna sifaha uu ku soo xusay isla markaana aan ka gudoomay kuna qancay.

SAXIIXA WAK. IIBIYAHA

Cabdi Saciid Sh. Cali Cilmi.

ADDI SAID SH

SAXIIXA IIBSADAHA

Maxamed Tawane Sabriye.

SAXIIXYADA MARQAATIYAASHA

1-)Cali Xirsi Cali "Dhabac"

2-)Raage Xasan Saciid.


Rep. 66248/2018.

(CADDAYNTA XAFIISKA NOOTAAYAHA)

Tr. 01/01/2018

Aniga Nootaaya Muqdisho, Dr.Saciid Cali Cosoble waxaan caddeynayaa in saxiixyada sare yihiin kuwii runta ahaa ee 1-) **Cabdi Saciid Sh. Cali Cilmi**, Somali ah, Ku Dhashay Wajir, Sanadkii 1950, oo Sita Kenyan Passport N0.A112325, Hooyadiisna layiraahdo Canbaro Xasan Jimcaale, Ahna (**Wakiilka iibiyaha**), 2-) **Maxamed Tawane Sabriye**, Somali ah, Ku Dhashay Muqdisho, Sanadkii 1978, Hooyadiisna layiraahdo Faadumo Daahiye Cabdulle, Degan "Muqdisho" Ahna (**Iibsade**), iyo waliba Labada nin ee Soomaaliyeed ee dhanka maragga ka caawiyey oo kor ku xusan. Dadkaan oo anigu aqoonsadey hubiyeyna in magacyadas ay leeyihiin waxay heshiis kaan igula saxiixeen xafiiska iyaga oo xis qaba raalina ku ah.

By. C/fitaax





JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMALIYA
Wasaaradda Maaliyadda
Waaxda Canshuuraha Barriga
WARQADDA RUQSADA GADIDDA HANTIDA

TIRSI #:36261



Waaxda Canshuuraha Barriga ee Wasaaradda Maaliyadda waxey ruqseysaywareejinta hantida ay faahfaahinteedu hoos ku xusan tahay:

NOOCA HANTIDA MA GUURTADA AH :	GURI DHISAN		
LOT NUMBER	133 ILAA 136,130,131,121	TITLE DEED NO.	WML 58907/2017 TR. 04/11/2015...
DEGMADA	HODAN	CABIRKA	60X20+30X20+20X15
CIDDA WAREEJINEYSA	CABDI SACIID SH.CALI		
CIDDA LAGU WAREEJINAYO	MAXAMED TAWANE SABRIYE IYO 5 KALE		
NOTARY	SACIID NOGTAAYO	NOTARY REF	66248 - 66251,66253/17
QIIMAHA LAGU KALA GATAY	\$409,000.00		

Taariikda la bixiyey:

1/3/2018 5:27:08 AM

Waaxda Canshuuraha Barriga

Aspose



TRS-30164-
2017



Sarow

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA
SOOMAALIYA



REP. NO. 20100/17



DAYAH MOGADISHU NOTARY PUBLIC
DR' ADEN JUM'ALE MOHAMED
TEL:- 061-5189259 / 0722148780
Email: Dayax600@gmail.com

XAFIISKA NOTAAYAHA DAYAX
MUQDISHO
ORIGINAL
Laanta Nairobi Kenya

Tr: 16-170/2017

UJEEDO: WAKAALAD GAAR AH (PROCURO SPECIALE)

Nairobi maanta oo ay tariikhdu tahay 16/10/2017, Anigoo ah FATUMA CALI SACHID, Somali-Kenyan ah, Leh ID No.26187677, dagan Nairobi-Kenya, Ayaan waxaan qoraalkaan ku caddeynaya inaan wakiishay CABDI SACHID SHEEKH CALI, Somali ah, Dagan Xamar, una wakiishay in uu ii gado, iibiyo, dhiso, dayactiro, u daewoodo, qareen u qabto, maxkamadaha hortooda maslaxad ka galo, nus milkiyada aan ku leeyahay guriga ku yaala Magaalada Muqdisho, Degmada Hodan, Loona yaqaano Daarta maslax, kana kooban dhismo Sadax dabaq ah, Cabirkiisuna yahay 50X138-M, Soohdintiisuna tahay Galbeed waxaa ka xiga wadada Laami ah ee Xamar Afgooye, Bari waxaa ka xiga Jid Cade, Koofur waxaa kaxiga Liibaan Tahliil, Waqooyi waxaa ka xiga qaybta Abuukar Cumar Cadaan, sida ku cad Rep.58907/2015, Tr 04/11/2015, kana soo baxday xafiiska Notaayaha Muqdisho, uuna ku saxiixanyahay Dr.Saciid Cali Cosoble, Sidaas darteed Anigoo ah FATUMA CALI SACHID, waxaan sii caddeynayaa in wakiilkeyga CABDI SACHID SHEEKH CALI, u madaxbanaan yahay iibinta, gadista, iyo dayactirka Nus milkiyada aan ku leeyahay gurigaas kor ku xusan, waxaan wakaaladdaan saxiixay Anigoo miirkeygu taam yahay, waxgaradkeygu wanaagsan yahay xor'ahay cidna iqasbin, wax alaale iyo wixii aan ku cadeyn wakaaladaan gaarka ah waxaa looraacayaa sida uu sharcigu qabo.


1. FATUMA CALI SACHID (WAKIILATO) _____
2. CABDI SACHID SHEEKH CALI (LA WAKIISHE) _____

SAXIIXA LA SUGAY
XAFIISKA NOTAAYAHA DAYAX

Anigoo ah Dr' Aadan Jima'ale Mohamed(Dayax), Notaayo Muqdisho ah, laanna ku leh dalka Kenya magalada Nairobi, waxaan cadaynayaa in saxiixyada kor ku cad ay yihiin kuwii dhabta ahaa ee FATUMA CALI SACHID, Somali ah, ahna wakiilato, iyo Midkii la wakiishaha ee CABDI SACHID SHEEKH CALI, Somali ah, oo qoraalkaan wakaalada gaarka wakiishaha ku saxiixay Xaafiiska Notaayaha hortiisa.



(Xafiiska Notaayaha Dayax)
(Dr' Aadan Jima'ale Mohamed)



JAMHURI YA KENYA  **REPUBLIC OF KENYA**
SERIAL NUMBER: 230620837 ID NUMBER: 26187677
FULL NAME: **FATUMA ALI SAID**
DATE OF BIRTH: 08.03.1988
SEX: FEMALE
DISTRICT OF ISSUE: TSILO
PLACE OF ISSUE: PUSWANI
DATE OF ISSUE: 21.02.2017
ISSUING OFFICE: 
 

XAFIISKA NOTAAYAHA
DAYAX MUQDISHO
16 OCT 2017
MAANTA NAIROBI - KENYA



XAFIISKA NOOTAAYAHA MUQDISHO

UJEEDDO:- (**WAKAALAD GUUD "Procuero de generale"** .)

Muqdisho, manta oo taariikhdu tahay Shan iyo Tobanka Bisha Octobar, ee Sanadka Labada Kun Toban iyo Todobada. (15/10/2017).

1-)Aniga oo ah Muna Cali Saciid Sh, Cali, Waxaan Qoraalkan ku caddaynayaa aniga oo xis qaba in aan Wakiishay Cabdi Saciid Sh, Cali Cilmi iyo wakiishay Wakaalad Guud inuu dhaxalkoob u sameyun karo, maamuli karo, xafidi karo, ku iibin karo qiimigii uu u garto, kireyn karo, ka saari karo, rahan galin karo, ka saari karo, saxiixi karo kaalintayda, maslaxaad ka gali karo kaalintayda, ku doodi karo, kuna dacwoon karo oo qareen u qaban karo haddii laga fursan waayo, Qeyb dhaxleedka iiga soo aado dhamaan hantida uu nooga tagay aabaheen Marxuum Cali Saciid Sh, Cali Cilmi. Hantidaas oo ah Guurto iyo Ma guurto Mood iyo nool intaba.

Waxaan mar kale sii caddaynayaa in Cabdi Saciid Sh, Cali Cilmi, awoodaas aan siiyay uu u madax banaan yahay oo aniga qeyb dhaxleedkaas aan soo sheegay ka macaamilidiisa wax la iiga baahan karo aysan jiri doonin.

2-)Aniga oo ah Cabdi Saciid Sh, Cali Cilmi, Waxaan Qoraalkan dhankayga ku caddaynayaa in aan aqbalay awooda ay i siisay Muna Cali Saciid Sh, Cali, isla markaana aan xilkaas uga soo bixi doono si hufan oo shareecadda islaamka waafaqsan insha alaaah.

=**SAXIIXA AWOOD BIXISADA**=
Muna Cali Saciid Sh, Cali.

=**SAXIIXA LA WAKIISHAHA**=
Cabdi Saciid Sh, Cali Cilmi.

Muna Cali Saciid

=**(SAXIIXYDA MARKHAATIYAASHA)**=

1-)Cali Xirsi Cali "Cali dhabac"

2-)Raage Xasan Saciid.

Rep.65147/2017.

(CADDEYN TA NOOTAAYAHA.)

Tr.15/10/2017.

Aniga Nootaaya Muqdisho, Dr.Saciid Cali Cosoble, waxaan caddeynayaa in saxiixyada sare yihiin kuwii dhabta ahaa ee 1-)Muna Cali Saciid Sh, Cali, Somali ah, Ku Dhalatay Nairobi, Sanadkii 1986, Kii, oo sidata Kenya Passport No. A2022283, Hooyadeedna la yiraahdo Farxiyo Maxamed Cali, Ahna (Awood Bixiso). 2-)Cabdi Saciid Sh, Cali Cilmi, Somali ah, Ku Dhashay G/kacyo, Sanadkii 1950, Kii, Hooyadiisna la yiraahdo Cambaro Xasan Jimcaale, "Degan Muqdisho" Ahna (La Wakiishe), iyo waliba labada nin ee Soomaaliyeed ee dhanka maraga ka caawiyey oo kor ku xusan. Dadkaani oo anigu aqoonsadey hubiyeyna in magacyadas ayleeyihiin waxay heshiiskan igula saxiixeen xafiiska iyaga oo xis qaba raalina ku ah.

By Madaxey



=**NOOTAAYAHA**=
(Dr. Saciid Cali Cosoble)

Xafiisku wuxuu ku yaal inta u dhaxaysa masjidka Abu Hurayra iyo shirkadda Dahabshill
suuqa Bakaaaraha Mogadishu - Somaliaya

E-mail : nootaayoxamar@hotmail.com, nootaayomuqdisho@gmail.com Website : www.nootaayo.com

WAKAALAD BIXISADA.

Muna Cali Saciid Sh, Cali.





XAAFIISKA NOOTAAYAHA MUQDISHO

UJEEDDO:- (HISHIIS KALA QAYBSI DHUL GURI SADEX DABAQ AH KA DHISAN YAHAY)

Muqdisho, maanta oo ay taariikhdu tahay Afarta bisha November ee sanadka labada kun toban & Shanta (04.11.2015.) Aniga Nootaaya Muqdisho, Dr. Saciid Cali Cosoble oo Xaafiis ku leh Suuqa Bakaaraha inta u dhaxaysa Shirk.D/shiil & Masjidka Abuu hureyre ee Magaalada Muqdisho, waxaa Xaafiiskeyga iigu yimid iyaga oo soo heshiiyey ina weydiistey inaan u kala qoro heshiiskooda ujeeddada sare ku xusan dadka Soomaaliyeed ee halkaan hoose ku kala caddeynaaya sidatan:

DARAFKA 1, AAD Cabdi Saciid Sheekh Cali, Wakiilna ka ah Muna Cali Saciid & Faadumo Cali Saciid, Sida Ku Cad Wakaalad Gaar ah Rep:-52927/2015 Tr.14/10/2015, iyo warqada dhaxal qaybsi No, Rep, 52945/2015, Tr, 05/11/2015, kana soo wada baxeen Nootaayo Dr, Maxamuud Xuseen Dirshe Laanta Nayrobi, dhulkaasoo ay ka dhaxleen aabahood Marxuum Cali Saciid Sh Cali, oo dhulka oo dhan ka iibsaday Maslax Maxamed Siyaad, sida ku cad warqadda Taariikhdeedu tahay 18/2/1997 Uuna saxiixa Avokate Abdinasir M Abdulahi, isla markaana wata labada warqadood ee tanaasulka Tr, 2/4/2015, iyo 27/10/2013, QSD001/2013, kana soo baxaday Qonsuliyada Dubai. ayna soo qoreen Muriidi Axmed Maxamuud (Dalfac) iyo Maxamuud Maxamed Ismaaciil.

DARAFKA 2, AAD Abuukar Cumar Cadaan, oo leh laba saami dhulka sare ku xusan, oo uu ka iibsaday 1-C/fitaax Maxamed Macalin, 2-C/kariin Cumar C/laahi, Sida ku Cad W.M.L.56754/2014, Tr 20/11/2014, kana soo baxaday Nootaayo Muqdisho, uunsasaxiixar Dr, Saciid Cali Cosoble.

Anaga oo kala ah Darafka 1, aad Cabdi Saciid Sheekh Cali, Darafka 2, aad Abuukar Cumar Cadaan waxaan Si Wada Jir ah Qoraalkaani Ku caddeynaynaa anaga oo Maskaxdeenu Taam tahay in aan Qaybsanay Dhulka aan tilmaamihiisa kor ku soo sheegnay.

A-) Darafka 1, AAD Cabdi Saciid Sheekh Cali, oo Wakiil u ah Labada Gabdhood oo lagu kala Magacaabo Muna Cali Saciid & Faadumo Cali Saciid, Waxey Labadaasi Gabdhood Qayb ahaan u heleen Guri Ka kooban 3, Dabaq oo Ku Yaalo Xamar Degmada Hodan Loona Yaqaano (Daarta Maslax) Cabirkiisuna Yahay 50X138.M. Soohdintiisuna tahay Galbeed waxaa ka xiga wadada laamiga ah ee Xamar Afgooye, Bari waxaa ka xiga JID cade, Koofur waxaa ka xiga Liibaan Tahaliil, waqooyi waxaa ka xiga Qaybta Abuukar Cumar Cadaan,

B-) Darafka 2, aad Abuukar Cumar Cadaan Wuxuu qayb u qaatay Dhul Banaan oo Cabirkiisu Yahay 50X138.M kuna yaal Xamar Deg Hodan (Daarta Maslax) Soohdintiisuna tahay Galbeed waxaa ka xiga wadada laamiga ah ee Xamar Afgooye, Bari waxaa ka xiga JID cade. Koofur waxaa ka xiga Qaybta ay qaateen Muna Cali Saciid, iyo Faadumo Cali Saciid. Waqooyi waxaa ka xiga dhul dad.

NB dhulka asal ahaan waxaa lahaa SHIRKADDA ICC, Intenational Constation and Commarcail Company. Sida ku cad warqadda kala iibsiga Rep49402/85, Tr, 01/4/85, iyo warqadda dhismaha shirkadda Rep, 48476, Tr, 25/7/84, kana soo wada baxeen Nootaayo Muqdisho, uuna saxiixay Dr, Muumin Axmed Abuukar, waxaana wada lahaa 1-C/fitaax Muriidi Axmed, 2-C/fitaax Maxamed Macalin, 3-C/Karin Cumar C/laahi, iyo Maxamuud Maxamed Ismaaciil, oo Maslax Maxamed Siyaad. ku qortay, sida ku cad warqadda tanaasulka Tr, 2/4/2015, afar saami ayaa ninkiiba hal saami lahaa, laba saami waxaa iibsaday abuukar Cumar cadaan, labadii saami ee kale, waxaa yeeshay Maslax Maxamed Siyaad maslaxna wuxuu 1997 dhulkoo dhan ka iibiyay Cali Saciid Sheekh Cali, laakiin kadib markii la xisaabtamay waxaa cadaatay in Cali Saciid Sh Cali, yeeshay kala bar oo bar dhulka tilmaamihiisa aan kor lagu soo sheegnay.

Sidaasi daraadeed, waxaan labadeena daraf caddaynaynaa in daraf kastaa u madax banaanyahay dhulka iyo cabirka iyo sohdinta kor ku qoran, uuna iibsan karo, hibayn karo, dhisan karo, rahan



L-65285
Tr 25/10/2017
20x30

L-125-127

① Rep: 66248/17
W.D.H (20x15)-M
Lotto (134)-1/1/18

② 66249/17-
W.D.H (20x30) Lotto (135-136)
TR-1/1/18

③ Rep: 66250/17-
W.D.H (20x15)-M
Lotto (121) TR=1/1/18

④ Rep: 66251/17 (20x15)-M
Lotto (133) TR-1/1/18

⑤ Rep: 66252/17 (20x15)-M
Lotto (123) TR-1/1/18

⑥ Rep: 66253/17 (20x15) Lotto (130)
TR-1/1/2018

Rep=65165

W.D.H (20x30)-M

Lotto (111-113)-

TR-17/10/2017

L-65193

Tr 19/10/2017

20x30

L-128

129

Rep=65170

W.D.H (20x15)-M

Lotto (119)-

TR-17/10/2017

Bee

Rep=65277/2017

TR-21/10/2017

W.D.H (20x15-M)

L- (732)

Rep-65166

Tr 17/10/2017

20x30

L-115-117

Rep=65253-

W.D.H (20x15)-M

Lotto (131)

TR-23/10/2017

(2)

SAXIIXA DARAFKA KOOWAAD
Cabdi Saciid Sheekh Cali

SAXIIXA DARAFKA LABABAD
Abuukar Cumar Cadaan

= **SAXIIXYADA MARKHAATIYAASHA.** =

1-) Cali Cabdi Axmed "Cali gesdheer".

2-) Cali Xirsi Cali "Cali Dhabac".

= **XAFIISKA NOOTAAYAHA MUQDISHO.** =

REP. 58907/2015

(**SAXIIXYO LA SUGAY.**)

Tr.04/11/2015.

Aniga Nootaaya Muqdisho Dr. Saciid Cali Cosoble waxaan caddeynayaa in saxiixyada sare yihiin kuwii dhabta ahaa ee 1) **Cabdi Saciid Sheekh Cali** Somali ah Sita Kenya Pass.l.r.A112325, oo ah (Darafka 1,aad) 2-) **Abuukar Cumar Cadaan** Somali ah Sita Som.Pass.l.r.P00027977 (Darafka 2,aad) iyo waliba labada nin ee Soomaaliyeed ee dhanka maraga ka caawiyey oo iyana sare saxiixeyn.

Dadkaan Soomaaliyeed oo aan aniga nootaayo ahi aqoonsadey habsadayna in magacyadaas la kala yiraahdo waxay heshiisnaan ku kala qorteen igulana saxiixeen Xaafiiska, iyaga oo xor ah raalina ku ah.

BY. Maxamed.



NOOTAAYAHA=
Dr. Saciid Cali Cosoble

UJEEDO:- CADDEYN SUGITAAN DHAXAL.

Nairobi maanta oo ay tariikhdu tahay 05/11/2015, Anagoo kala ah CABDULLAHI NAASHI DIINI, Somali-Kenyan ah, leh ID No.213456496, dagan Nairobi-Kenya, iyo SHEEKH CABDULLQADIR XAASHI CALI, Somali ah, sita warqada Aqoonsiga No.W603240516809-USA-MINNESOTA, dagan Nairobi-Kenya, Ayaan waxaan si wada jir ah qoraalkaan ku wadda cadeyneynaa, in uu geeriyooday Marxuum Cali saciid Sheekh Cali, kuna geeriyooday Xaafada Eastligh Nairobi-Kenya Tr 28/2/1998, kana tagay dhaxaltooyada hoos ku cad oo kaliya:-

1. Marxuum SACIID SHEEKH CALI, ahna Marxuumka Aabihiis.
2. MUNA CALI SACIID, ahna Gabadha marxuumka.
3. FAADUMO CALI SACIID, ahna Gabadha Marxuumka
4. SAHRO KHALIF MAXAMUUD, ahna Xaaska marxuumka.

Majirto cid kale oo dhaxleeyso Marxuum Cali Saciid Sheekh Cali, Hooyadiina isaga hortii aycey geeriyootay, Sidaas darted wixii hanti iyo tarako ah ee uu marxuumku lahaay, waa mid ay yeelanayso dhaxaltooyadda kor ku xusan oo kaliya, waxaanu ku dhaxalsiinay shareecada Islaamka Taariikhda marka ay ku beegneeyd Bishii Shanaad 1998-dii, iyadoo qof walaba Nasiih u helay Hantida ku hor qoran:-

1. Guriga ku yaala magaalada Muqdisho, Xaafada Madiina Soono Airporka, Cabirkiisuna yahay 20X20-M, kana kooban Dhismo Labo Dabaq oo Shub ah, iyo labo Baabuur oo Mercedes Benz ah waxaa helay Marxuumka aabihiis oo ah Marxuum Saciid Sheekh Cali, oo xiligaasi Noolaay
2. Gabdhaha kala ah Muno Cali Saciid, iyo Faadumo Cali Saciid, waxeey heleen guriga ku yaala Magaalada Muqdisho, Degmada Hodan, Zoonaha X-Control, loona Yaqaano (guriga Maslax), Cabirkiisuna yahay 50X130-M, iyo guriga ku yaala Dalka Kenya, gaar ahan Magalada Nairobi, Xaafada South-C, Mugoye State.
3. Sahra Khaliif maxamuud oo ahceyd xaaska marxuumka una dhalina wax Awlaad ah waxeey Heshay guri ku yaala Magaalada Muqdisho, Degmadda Wadajir, Zoone Booli-Qaran, iyo hal baabuur oo Mercedes Benz, looguna qiimeeyay hantidaas Boqol iyo Afartan Kun oo Dollar una qaadatay Kash.

Sidaas ayaan ku dhameeynay dhaxlida hantida Marxuumka, qof walbana waxuu xaq u yeeshay hantida ku hor qoran kadib marka aan ku dhaxalsiinay sida ay shareecada islaamka qabto, hadaba anagoo ah Culumadii u fadhiisataya dhaxalsiisayna dhaxaltooyada kor ku xusan ayaanu waxaa cadeeyntaan sugitaanka dhaxal qebsiga ah saxiixnay Anagoo Miirkeeynu taam yahay, waxgaradkeeynuna wanaagsan yahay, xor.nahay cidna na qasbin, wax alaale iyo wixii aan ku cadeeyn cadeeyntaan waxaa loo racaya sida uu shareciga qabo.

2. SHEEKH CABDULLQADIR XAASHI CALI (CADEEYE)

REP.52945/2015.

BY:-

ALLOSMAN HUSSEIN
MI NOTAYAH
XAFISKA * NOTAYAHA * SHO


NOTAYAHA

DR MAXMUD XUSEEN DURSHEE

XAFISKA * NOTAYAHA * SHO




Qunsuliyadda Guud ee Jamhuuriyadda Federaaliga ee Somaliya, Dubai

Tel.: +971 4 2722559, Fax : +971 4 2711203, P.O. Box : 63993, Dubai - United Arab Emirates
E-mail: somcon@eim.ae

UJEEDDO: CADDAYN TANAASUL DHUL IYO GURI

